



Saacada qiyaame dhicimayso ilaa waqtigu isku soo dhawaado

Abii hurayra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee ayaa yiri: "Saacada qiyaame dhicimayso ilaa waqtigu isku soo dhawaado, oo sanadku bil le'ekaado, bishuna jimce le`ekaato, jimcaduna maalin le'ekaato, maalintu saacad le'ekaato, saacaduna inta laan timireed gubanayso le'ekaato."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Axmed]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu sheegay inay calaamadaha saacada qiyaamaha ka mid tahay waqtiga oo isku soo dhawaada. Sanadka ku dhaafin inta Bishu kugu dhaafto oo kale. Bishuna ku dhaafto inta Usbuucu kugu dhaafto oo kale, jumcaduna ku dhaafin inta maalintu ku dhaafto kale, maalintuna ku dhaafin inta saacadu ku dhaafto, Saacaduna waxay kuu dhaafin si deg-dega, oo lamida inta laan timireed ay ku guban karto oo kale.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65027>

